Waalidka ama Masuulka Qaaliga ahoow,

Diiwaanadayadu waxay muujinayaan in ilmahaagu **aanu ilaa hadda u dhammaystirnayn tallaalkooda measles, mumps, and rubella (MMR, jadeecada, qaamo-qashiirka, iyo rubeelada).**

Haddii uu **cudur jadeeco ka dillaaco** barnaamijkeenna, ama bulshada dhexdeeda, waaxda caafimaadku waxay uga baahan kartaa qof kasta oo aan qaadan tallaalkiisa MMR, ama aan muujin karin caddayn difaac ka dhan ah (ka hortagga) jadeecada, inuu **guriga joogo ilaa 21 maalmood** kadib markii uu cudurku soo gaaray. Tani waxay gacan ka geysataa joojinta faafitaanka jadeecada.

Tallaalka MMR waa habka ugu wanaagsan ee lagu ilaalin karo ilmahaaga iyo dadka kale. Haddii ilmahaagu dhawaan qaatay tallaallo, fadlan keen foomka Certificate of Immunization Status (CIS, Shahaadada Xaaladda Tallaalka) ee la cusbooneysiiyay.

Jadeecadu aad bay u faaftaa si dhakhso ah ayayna u faafi kartaa. Waxay sidoo kale sababi kartaa dhibaatooyin caafimaad oo halis ah. Wixii macluumaad dheeraad ah, fadlan booqo Washington State Department of Health (Waaxda Caafimaadka ee Gobolka Washington): doh.wa.gov/measles.

Waxaan kugu dhiirigelinaynaa inaad la hadasho dhakhtarkaaga daryeelka caafimaadka haddii aad qabto wax su'aalo ah oo ku saabsan jadeecada iyo tallaalka MMR.

Si daacadnimo leh,